

*Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Galmudug
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha*



**Galmudug State
Ministry of Finance & Economic Development**

جمهوريه الصوماليه الفدراليه
حكومة اقليم جالمندج
وزارة المالية وتنمية الاقتصاد

Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka ee 2018

Waxaa uu dhaqangalayaa laga bilaabo

1 Jan 2019

**Xeer-nidaamiye #5
Abuurista Habraacyada Maareynta Kaashka & Xisaabaadka Bankiyada**

1. Awoodda & Hadafka

1.1 Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Madaxa VI, Qaybaha 28 & 29 ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2017 (*PFM Act*). Xeer-nidaamiyahan waa “xeer la diidi karo” sida loogu qeexay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha waxaana sida ay dhigeyso Qaybta 7aad uu marayaa muddo aan ka badneyn tobant (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka.

1.2 Hadafka laga leeyahay xeer-nidaamiyahan waa in uu faahfaahin dheeri ah ka bixiyo maareynta lacagta kaashka ah iyo hawlgaallada iyo maareynta xisaabaha bankiyada ee Dowlad-goboleedka Galmudug

1.3 Xeer-nidaamiyahan ma bixinayo habraacyo ku saabsan sida loo maareeyo xisaabaha bankiga ee Dowlad-goboleedka Galmudug. Habraacyadaas waxaa ay ku jiraan *Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga* oo loo saarey Tilmaan-bixin ugu noqdo Xeer-nidaamiyahan

2. Maareynta Lacagaha Kaashka ah

2.1. Ilaalinta Lacagta Kaashka ah

2.1.1. Waa in lacagaha kaashka ah ee la soo ururiyo maalin kasta lagu shubaa xisaabta bankiga ee Dowlad-goboleedka Galmudug. Haddii ay dhacdo in loo baahdo in lacag kaash ah ay habeen dhaxdo waa in lagu hayo goob dhexe oo amnigeedu sugar yahay oo uu u cayimey Agaasimaha Guud/Xoghayaha Joogtada ah.

2.1.2. Marka lacagaha kaashka ah ee la soo ururiyey ay tahay in la geeyo bankiga waa in amnigeeda si weyn loo ilaaliyaa mar kasta iyada oo hawsha banki ku shubista ay sameynayaan laba sarkaal

2.2 Saadaalinta Kaashka

2.2.1. Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha waxaa ay mas'uul ka yihii in ay la socdaan dakhli ururintooda iyo kharash-gareyntooda iyaga oo u eegaya miisaaniyadda loo qoondeeyey & qiyaasaha dakhliga. Sida ay dhigeyso qaybta 23 (5) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (*PFM Act*), Qorsheyaasha Sanadlaha ah ee Dakhliga iyo Kharash-gareynta (Qorshe-Sanadeedka) ayaa looga baahan yahay in loo gudbiyo Wasiirka kaas oo soo koobaya qiyaasaha dakhliga iyo kharashaadka ee bil walba. Waa maclumaaadka billaha ah ee ku jira Qorshe-Sanadeedyada kan salka u noqonaya oo ay Waaxda Khasnadda ay kula soconeysa kaashka Dowlad-goboleedka Galmudug.

2.2.2. Qorshe-Sanadeedka waa in uu u sameysnaadaa qaabka uu u go'aamiyo Wasiirka, kaas oo uu u soo saarayo isaga oo ah Tilmaan-bixin/Amar oo qayb ka ah meertada diyaarinta miisaaniyad-sanadeedda oo waafaqsanna waqtiga uu siinayo Kalandarka Miisaaniyadda oo lagu soo koobey wareegtada miisaaniyad-sanadeedda.

2.2.3. Qorshe-sanadeedyada La Ansaxiyo waa in ay hayaan saraakiisha ka mas'uulka ah Maareynta Kaashka ee Wasaaradda Maaliyadda ka tirsan. Maareynta Kaashka waxaa korjoogteynaya Waaxda Khasnadda, ee Wasaaradda Maliyadda, iyaga oo sameynaya saadaasha kaashka ee bil walba ee sanad-

maaliyadeedka markaa socda iyada oo ku saleysan maclumaadka ay Hay'adaha Kharash-gareynta ku soo gudbiyeen qorsheyaashooda dakliga iyo kharash-gareynta ee sanadlaha ah.

2.2.4. Saadaalaha waa in toddobaad walba wax laga beddelaa si loogu daro kharashka dhab ahaan la bixiyey iyo dakhliga dhab ahaan la soo ururiyey, waana in sidaa la sameeyaa 2 maalmood gudahood marka uu dhammaado toddobaadka. Maclumaadkan waxaa laga helayaa FMIS-ka Dowlad-goboleedka Galmudug marka la soo saarayo Warbixinta Qaybta Miisaaniyadda (*the Budget Segment Report*).

2.2.5. Ka beddelnaan kasta oo ka beddelan saadaasha waa in islamarkii lagu wargeliyaa Agaasimaha Miisaaniyadda iyo Agaasimaha Khasnadda waana in dib loogu soo wargeliyaa Wasaaradda/Hay'adda ka mas'uulka ah.

2.2.6. Wasaaraddu waxaa ay hay'adda kharash-gareynta ay waqtii kasta ka codsan kartaa macluumadka ugu dambeeya ee la xiriira kharash-gareynta iyo dakhli-ururinta in loogu soo gudbiyo qaabka lagu tilmaamey Xeer-nidaamiyaha 6aad. Waa Mas'uuliyadda Hay'adda Kharash-gareynta in ay maclumaadkan ku bixiso saddex (3) maalmood gudahood oo ka bilowda marka laga soo codsado.

3. Xisaabaha Bankiyada

3.1. Ka-shaqeysiinta Xisaabaha Bankiga

3.1.1. Xisaabta Keliya ee Khasnadda iyo xisaabo bank oo kasta oo kale oo ay yeelaneysa Dowlad-goboleedka Galmudug waa in la is-waafajiyaa sida wanaagsanna waa in is-waafajintaa la sameeyaa maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar 2 maalmood gudahood marka uu dhammaado toddobaadka ayna is-waafajintaas sameeyso Waaxda Khasnadda, Wasaaradda Maaliyadda iyada oo la adeegsanayo nidaamka maareynta maaliyadda maamulka (FMIS) ee Dowlad-goboleedka Galmudug.

3.1.2. Is-waafajin kasta waa in uu eegaa uuna ansaxiyaa Khasnajiga ama sarkaal sare oo loo igmadey arrintaas.

3.1.3. Is-waafajinta bankiga iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba.

3.1.4. Saraakiisha ka shaqeysiinaya xisaabaha bankig ee rasmiga ah waa in aaney oggolaan in xisaabahaasi laga saaro lacag ka badan inta ku jirta. Lacagaha dheeriga ah ee dad lagu leeyahay waxaa lagu sharxay Xeer-nidaamiye #7, *Abuurista Oggolaanshaha Kala duwan (Establishing Sanctions)*.

3.1.5. Xisaabaha Bankiga waxaa laga furi karaa keliya hay'adda maaliyadda ee Dowladda/bankiyada ganacsiga ee ay ka furan tahay xisaabta Keliya ee Khasnadda, haddii Wasiirka uu oggolaado in meel kale laga furi karo ma ahee.

3.1.6. Faahfaahinta xisaabaha bankiga waa in la geliyaa nidaamka maareynta maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug iyada oo siineysa summad u gaar ah.

3.1.7. Xisaabta bankiga ee la abuurey waxaa lagu qorayaa diiwaanka bankiga oo ay maamusho Waaxda Khasnadda. Diiwaankan waxaa ku qoran faahfaahinta la xiriirta dhammaan xisaabaha banki ee ay furto ayna ka shaqeysiiso dowladda sida lagu sharxay *Tilmaan-bixinta I, Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga/Bank Account Procedures Manual*.

3.1.8. Wasiirka ayaa marka uu doono codsan kara macluumaadka uu uga baahdo xisaab banki oo kasta oo ay leedahay Dowlad-goboleedka Galmudug. Macluumaadkan waa in lagu soo diyaariyaa laba maal mood oo la shaqeeyo gudahood oo ka bilowda marka uu Wasiirku soo codsado.

3.2 Saxiixayaasha

3.2.1. Saxiixayaasha xisaabaha Bankiga ee Dowlad-goboleedka Galmudug waxaa ka mid ahaanaya ugu yaraan laba saxiixe oo saxixa xisaabta bankiga kuwaas oo midkood ay waajib tahay in uu ahaado Agaasimaha Guud / Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Maaliyadda iyo iyada oo ahaanaya kuwo waafaqsan noocyada lagu sheegey *Tilmaan-bixinta I, Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga / Bank Account Procedures Manual*.

3.2.2. Wax-ka-beddelka lagu sameynayo saxiixayaasha xisaabaha bankiga ee Dowlad-goboleedka Galmudug, waa in loo sameeyaa si waafaqsan *Tilmaan-bixinta I, Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga / Bank Account Procedures Manual*.

3.3 Furidda Xisaabaha Bankiga

3.3.1 Lama furi karo xisaab banki lagamana shaqeysiin karo mana sii jiri karto si loogu shubo iyo/ama si loogala soo baxo lacag dowladeed/dadweyne iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Wasiirka iyo iyada oo aan laga soo bixin shuruudaha kale ee Wasiirku u dejijo.

3.3.2 Lama oggolaanayo in la furo xisaab banki oo cusub haddii la haysto tas-hiilaad banki oo dad ku filin oo uu Wasiirku u arko in ay ku filan yihiin ujeeddooyinka Wasaaradda/Waaxda

3.3.3 Waa in codsi lagu furayo xisaab banki ama loogu sheegayo in wax laga beddelo xisaab banki loo soo gudbiyaa Wasiirka iyada oo la adeegsanayo foomka loogu talogaley ee la socda *Tilmaan-bixinta I, Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga/Bank Account Procedures Manual*

3.3.4 Marka uu furidda xisaab banki uu ansaxiyo Wasiirka, waa in Waaxda Khasnaddu ay soo saartaa tilmaan-bixinno qoraal ah oo ay bankiga ugu sheegeyso in uu xisaab u furo oo bixinayana muunado saxiixyada loo oggolaadey in ay saxixaan jeegagga ayna maareeyaan xisaabta bankiga iyada oo loo marayo qaabka iyo nooca lagu tilmaamey *Tilmaan-bixinta I, Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga/Bank Account Procedures Manual*.

3.4 Xiridda Xisaabaha Bankig

3.4.1 Marka hadafkii loo furey xisaabta bankiga la xaqijiyo, sida in uu dhammaadey mashruuca, sarkaalka mas'uulka ka ah oo ay khuseyso waa in uu codsi qoraal ah u soo gudbiyaa Wasiirka iyada oo la adeegsanayo foomka loogu talogaley oo ayna la socdaan dokumentiyada lagu sharxay *Tilmaan-bixinta I, Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga/Bank Account Procedures Manual*

3.4.2 Faahfaahinta xiritaanka xisaabta bankiga waa in lagu qoraa diiwaanka bankiga waana in sidoo kale la geliyaa nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda[FMIS].

3.5. Is-beddelka Lagu Sameeyo Xisaabaha Bankiga

3.5.1 Iyada oo qayb ka ah maamulka xisaabaadka bankiga ee joogtada ah, hay'adaha kharash-gareynta waa in ay Waaxda Khasnadda ay islamarkiiba ku wargelisaa is-beddel kasta oo lagu sameeyo

saraakiilka ka mas'uulka ah xisaabaha bankiga iyo saxiixeyaasha la ansaxiyey. beddelaad kasta oo lagu sameeyo naamuunadaha saxiixyada ee horey loo soo sheegey waa in sidoo kale uu Wasiirka ku wargeliya Baniga iyada oo nuqlu la siinayo Hintidhowrka Guud. Habraaca is-beddelka lagu sameynayo xisaab banki waxaa lagu sheegey Tilmaan-bixinta I, *Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga/Bank Account Procedures Manual.*

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Galmudug

Mudane: Saciid Siyaad Shirwac

